UN-HABITAT

Barnaamijka Degsiimada Aadamaha
ee Qarammada Midoobay



10. Xildhibaanka G/degaanka oo ah Awood Adeegsade



## Taxanaha Tababarka

Komishanka Yurub

## Xildhibaanka G/degaanka oo ah
# Awood Adeegsade

**Tilmaame-bare 10**

Tababarka Hoggaanka la Doortay

**Xarunta QM ee Degsiimada Aadanaha ( Habitat)**

# Xildhibaanka Degaanku markuu yahay Awood-adeegsade

## Tilmaame-baraha 10aad

# Tababarka Hoggaanka la soo doorto

**Tarjumaddii: Akaademiga Nabadda iyo Horumarka (APD)**

**Istanbul,1996kii- "Shir-madaxeedkii Caasimadaha".**

**Taxanaha Agabka Tababarka**

**X/dhibaanka Deegaanku markuu yahay Awood-adeegsade**

**Tababarka**

**Hoggaanka la soo doorto**



**HS/716/04SO**

# HORDHAC

Sida ay muujiyeen natiijooyinkii qiimayntii baahiyaha tababarka ee ay fulisay xarunta Qaramada Midoobay ee dad dejinta (Habitat) waxa cadaatay baahiyaha tababarka saraakiisha la soo doortay ee dawlada hoose, ama siyaasiyiinta bulshadu inay yihiin meelaha adduunka guud ahaan aadka loogu baahan yahay isla markaana ah goobaha aan aad loogu jeedin xagga tayo dhiska la xidhiidha horumarinta bulshada iyo maamulka dawlada hoose.

Sanaddii u dambaysay, tri dawladda ah oo kala duwan, sida Nepal, Poland, Uganda, Paraguay ayaa markii u horaysay mudo tobanaan sano ah ka dib, ama markii ugu horeysay waligeed ba, guda galay habkii ay ku dooran lahaayeen xubnahoodii golaha iyo maayaradoodii. Baahiyaha tababarka ee saraakiisha la soo doortay ee dawlada hoose waxa ay kaga jiraan ajendaha xagga sare, dalalka dimoqraadiyadoodu taabaqaaday sida: Ecuador, India, Marykanka.

Iyada oo baahiyaha laga jawaabayo ayay Xarunta dad dejinta ee Qaramada Midoobay (Habitat) diyaarisay oo tijaabisay taxane buugaag yar-yar ah si ay u caawiyaan xubnaha golaha sidii ay u meteli lahaayeen muwaadiniinta, loona heli lahaa hogaan bulsho oo si tayo leh ula shaqeeya dawlada dhexe iyo maamulka, qaybaha farsamada, xirfadlayda dawlada hoose, iyo ururada bulshada ee kale. Waxay buugagu ka hadlayaan siyaasada, go’aan qaashada,xidhiidhka, wada hadalka iyo hogaaminta, ka qayb qaadashada, maamulka, qabshada shirarka, shaqooyinka xubnaha golaha ee la xidhiidha suurtagelinta iyo fududaynta, maamulka maaliyada iyo baahiyaha kale ee khuseeya arimahaas.

Buuggan, “ Xubinta gole oo awoodiisa wax ku qabanaya” wuxuu ka mid yahay 12 buug ah, waxana ugu horayn loo jeedaa in ay isticmaalaan tababarayaasha jooga goobaha tababarka ee dalka ee wax u tababara dawladda hoose, ama jooga goobo tababar oo ka jira dawlada hoose gudaheeda. Waxa kale oo caawinaya tababarayaasha isticmaalaya buugan, buug kale oo la yidhaa “Buugii hagayay tababarayaasha hogaanka la soo doortay” oo ay daabacday Qarammada Midoobay xarunteeda da dejintu, kasoo aad ka helayso qoraaladii tababaraha oo si gaar ah loogu diyaariyey inay tababarayaashu ka faaiidaystaan mark ay u qorshaynayaan dood cilmiyeedada hogaanka la soo doortay ee buugan la xidhiidha.

Waxa la rajeynayaa in buugan tababarka ahi uu aad ugu qayb qaato sidii uu u xoojin lahaa tayada dawladaha hoose, isagoo soo bandhigaya dhaqano wanaagsan oo hogaaminta ah taas oo ah ujeedooyinkii u waaweynaa ee shirkii Qaramada Midoobay ee dad dejinta (HabitatII) ee sanadkii 1996kii.

Waxa aan jecelahay in aan u mahadnaqo Dr. Fred Fisher iyo Mr.David W. Tees diyaarinti ay buugan iyo qaar kale oo taxanaha ka mid ah diyaariyeen iyaga oo ay weheliyaan shaqaalaha xarunta dad dejinta ee Qaramada Midoobay(habitat) qaybta tababrka, taas oo ka mid ah barnaamijyada tababarka ah ee ay taageerto dawlada Netherlands. Waxa aan jecelahay oo kale in aanu ugga mahad celino qaybtii ay ka geysteen tababarayaasha iyo saraakiisha dawladaha hoose ee dalalka Costa Rica, Elsalvador, Kenya, Lithuania, Romania, Uganda, kuwaas oo naga caawiyey tijaabo-goobeedkii lagu sameeyey qalabka ( qoraalada) tababarka.

Dr. Wally N’Dow
Kaaliyaha Xoghayaha Guud.

**Xagga Koofiyadda**

**Koofiyadda qofka midigta ku sawirani gashan yahay ee bog kasta oo soo socda ku sawiran waxa loo doortay inay muujiso kaalinta X/dhibaanka Degaanka ee buugga lagu xusay**

**X/dhibaanka Degaanku markuu yahay Awood- adeegsade**

**Tababarka Hoggaanka la soo doorto**



## AQOONSI

Tarjumadda iyo habaynta af Soomaaliga ah ee Tilmaame-barayaasha Hoggaanka la soo doortay waxay ku hirgashay Barnaamajka Is-maamulka Fiican iyo Tababarka Hoggaanka la soo doortay ee ay maal-gelisay EU-du, isla markaana uu fuliyay Xafiis Goboleedka UN-HABITAT ee Afrika iyo Dalalka Carbeed.

Tarjumadda iyo habaynta af Soomaaliga ah ee Tilmaame-barayaashan Tababarka Hoggaanka la soo doortay, waxa ka hawl-galay koox tarjumadda ku xeel dheer oo ka tirsan: Akaademiga Nabadda iyo Horumarka, Jaamicadda Hargeysa iyo Jaamicadda Cammuud; iyaga oo ay ka caawisay Hay'adda QM ee HABITAT, laanteeda Hargeysa ku taal.

Mahad-naq gaar ah waxa mudan Akaademiga Nabadda iyo Horumarka oo ka hawl-gashay tifaf-tirka iyo isu-ekeysiinta Tilmaame-barayaashan.

Waxa kale oo mahad-naq mudan Jacfar Maxamed Gaaddaweyne oo Akaademiga Nabadda iyo Horumarka ee Somaliland ka tirsan, Maxamed Muumin oo Jaamicadda Bariga Afrika ee Puntland ka tirsan iyo Maxamed Afrax oo Xarunta Cilmi-baadhista iyo Dood-wadaagga ee Koonfurta-Dhexe ee Soomaaliya ka tirsan, kuwaas oo wada diyaariyay tarjumadda ereyada Ingiriisiga ah ee Tilmaame-barayaashan ku jira.

Mahad-naq gaar ah waxa isna mudan Maciej Sudra oo diyaariyay astaamaha iyo naqshadaha jaldiyada Tilmaame-barayaashan.

**Koofiyad dun ah oo uu gashan yahay Yemani Rakuub fuushani**

**X/dhibaanka**
**Degaanku**
**markuu yahay**
**Awood- adeegsade**

**Tababarka**
**Hoggaanka la**
**soo doorto**

# HALKA UU KAGA JIRO TILMAANE-BARAHAN


Sida loo Isticmaalayo Tilmaame-Barahan 1

**Qaybta 1aad.**

Xildhibaanka Degaanku markuu yahay Awood-adeegsade 3

Qeexid 5
Soo-ururin 5
Milicsi 5
Aragtiyaha iyo filradaha 6
Ma qof mise wadar 8
Milicsi 10
Fikrado kala duwan oo ku saabsan awoodda 11
Adiga iyo shaqaalahaaga ku kaalinaya 13
Samaynta xidhiidh tayo leh 14
Qodobbo muhiim ah 16
Raad-raac 17

**Qaybta 2aad**

Aqoon-is-weydaarsi Xildhibaanka Degaanku markuu yahay Awood-adeegsade 18

Muuqaal guud 20
10.1 Layli is-diyaarin ah: Gole magaalo oo awood badan 22
10.2 Layli: Tusmaynta Xidhiidhka awoodda 23
10.3 Bandhigga Tababaraha 25
10.4 Is-qiimayn: waydiimo qofahaaneed oo xooojin ah 26
10.5 Layli: Dhacdooyin badan oo ku saabsan isticmaalka awoodda 30
10.6 Layliga Xirfad gudbinta 34

# SIDA LOO ISTICMAALAYO TILMAAME-BARAHAN

Tilmaame-barahan loogu tala galay tababarka xubinta gole ee awooddiisa wax ku qabta, sida buugaga kale ee taxanahan ka midka ah waxa loo isticmaali karaa siyaalo badan.

**Diraasad kuu gaar ah**

Qoraalka bilowga u ah buugan waxa la rabaa inuu qofku iskii u isticmaalo. Waxa kaliya ee aad u baahantahay waa meel degan oo aad ku fikirto iyo waxoogaa waqti ah, iyo wax aad wax ku qorto. Si aad natiijo aad u fiican aad u heshid waxa aanu kugu dhiirinaynaa in aad qorto jawaabahaaga ku saabsan waydiimaha marba marka ka dambaysa lagugu waydiinayo qoraalkan. Qiimihii waxbarasho ee macluumaadkaa ayaa dhawr jeer u labanlaabmaysa akhristaha waqti siiya arimahan.

**Tababarka aqoon-is-weydaarsiga**

Qoraalada tababaraha iyo qalabka tababarka iyo layliga buugan waxaa looga jeedaa inay tababarayaasha khibradda lihi ka faa iidaystaan markaa ku isticmaalaan tababarka dood cilmiyeedka ah ee la siinayo xubnaha golaha ee ka kala socda dawladda hoose oo kala duwan. Waxana aanu halkan ku soo darnay siyaalo kala duwan oo waxbarasho iyo foomam tababarayaashu ka helayaan dabacsani una sahlaya in dood cilmiyeedku fuliyo baahiyaha gaarka ah ee xubnaha golaha ee tababarka ka qayb qaadanaya. Waxa kale oo aanu u jeednay markaanu diyaarinaynay buugan in aanu kugu dhiirino adiga (Tababaraha) inaad khibradaadii gaar buugan ku kordhiso si kor aad ugu qaado tayada waxbarashada ee qalabkan waxbarasho siinayo xubnaha ka qayb galayaasha ah.

**X/dhibaanka Degaanku markuu yahay Awood- adeegsade**

Tababare, waxaa laga yaabaa inaad goosato isticmaalka qalabka waxbarasho ee buugan ku xusan, iyada oo ah sideedaa imika loo soo bandhigayay. Haddii se aad doorbido waad u dhigi kartaa si kale adoo tartiibta u bedelaya kolba baahidu sida ay tahay, si aad u fuliso ujeedooyinka xaaladaha tababarka ee gaar ah. Saddex saacadood oo tababar ah ayaad bixin kartaa adoo tababarada muhiimka ah iyo qalabka ku xusan buugan isticmaalaya. Ama inta aad ka faa iidaysato waxyaalaha badan ee buugan ku xusan oo aad ku darto waxyaalo xagaaga aad kaga biirisay ayaad ka dhigi kartaa barnaamij maalin dhan ah.

**Tababarka Hoggaanka la soo doorto**

Buugana wuxuu ka mid yahay 12 buug oo taxana ah oo lagu tababarayo hogaanka la soo doortay. Waxaad go'aansan kartaa ama lagaa codsan karaa inaad isticmaasho qaar ka mid ah buugagan ama dhamaantoodba muddo dheer. Buug kasta oo taxanaha ka mid ah in kasta oo si gooni ka ah kuwa kale loo isticmaali karo, haddana iyaga oo sida ay iskugu xig-xigaan loo isticmaalaa waxa ay siinaysaa, xubnaha golaha ee ka qaybgalayaasha ah awood badan iyo khibrad waxbarasho oo midaysan.

## Tababarka kooxeed

Qalabkan waxa kale oo waliba la isticmaali karaa iyadoo sida door bidan la kaashanayo Tababare/sahle khibrad leh, si kor loogu qaaddo adeegga xildhibaanada deegaanka ee ka wada shaqeeya gole xukun oo isku mid ah. Marka la tababarayo xildhibaanno deegaan oo wada shaqeeya, waxa aanu rumaysanahay in sahluhu diyaar u yahay in uu u nidaamiyo arimaha tababarka ee buuggan siyaalo kala duwan. Waxa dhici karta marar aad adiga oo sahla ah aad dooran karto in aad ku kordhiso arimo cusub, iyada oo aad xaalada iyo sifooyinka kooxda aad eegayso. Waxa aanu rajaynaynaa in xaaladaha sidan oo kala ah aad u arki doonto buug yarahan "qalab adeeg" oo koobay fikrada tababar oo badan oo la isku dari karo, lana is ag dhigi karo, la toosin karo ama la iska dhaafi karo, kolba xaaladdu sida ay keento.

Waxaad ka helaysaa Tilmaame-barayaashan tababarka arimo dhawr ah oo aad kala dooranayso. Waxa aanu rajaynaynaa in aad si buuxda uga faa iidaysato**.**

**X/dhibaanka Degaanku markuu yahay Awood- adeegsade**

**Tababarka Hoggaanka la soo doorto**

**X/dhibaanka Degaanku markuu yahay Awood- adeegsade**

**Tababarka Hoggaanka la soo doorto**



# Qaybta 1aad

# Qormo

# Xildhibaanka Degaanku markuu yahay Awood-adeegsade

**X/dhibaanka**
**Degaanku**
**markuu yahay**
**Awood- adeegsade**

**Tababarka**
**Hoggaanka la**
**soo doorto**

Qormo

## Qeexid

Xildhibaanka Golaha Degaanku markuu yahay Awood-adeegsade wuxu isticmaalaa awooddiisa qof ahaaneed iyo ta rasmiga ah si uu wax u qabto.

## Soo-ururin

Qoraalkani waxa uu eegayaa mawduuca murugsan ee ah "Awoodda", kan oo la xidhiidha shaqadaada ah sarkaal la soo doortay. Waxa aynu dib u eegi doonaa qaar ka mid ah sharaxyada sooyaalka ah ee awooda, waxana aynu baadhi doonaa siyaalo ay saraakiisha la soo doortay ay sedan uga taya roonaanayaan, iyaga oo "Awoodooda wax ku qabanaya". Waxana aanu halkan ku xusaynaa in kaalinta awoodu ay tahay mid aad ugu dhaw in si xun loo adeegsado.

## Milicsi

Marka aan naftayda ka fikiro inaan ahay awoodiisa adeegsade waxyaalaha hoos ku xusan ayaa maskaxdayda ku soo dhaca.

1. ______________________________

______________________________

______________________________

______________________________

2. ______________________________

______________________________

______________________________

______________________________

3. ______________________________

______________________________

______________________________

______________________________

**X/dhibaanka Degaanku markuu yahay Awood- adeegsade**

**Tababarka Hoggaanka la soo doorto**

Qormo

## Aragtiyaha iyo filradaha

Sharaxa aanu siinay kaalintaada awood- wax-ku-qabasho waxa uu iska indha tirayaa murugga uu arinkani xambaarsanyahay. Nin ku takhasusay cilmiga siyaasadda ayaa ku shabahay awoodda " mid ka mid ah fikradaha taanbuuga wayn ee cabsida leh ee hoostiisa lagu hayo jimicsi-madadaaleed oo lagu dhacdhacsanayo (ciyaarayo) ugu yaraan saddex goobo". Ninka la yidhaa Max Weber, oo ah nin Jarmal ah oo ku takhasusay cilmiga bulshada, oo ku caan noqday sharixii uu ka bixiyay muuqaalka Biroqraadiyada ayaa mar yidhi:

> " Awooddu waxa weeye wax suurta gal ah oo qof kaliya oo jilaa ah oo ku xidhan bulsho uu is taago goob uu fulin karo waxa uu rabo, in kasta oo laga hor imanayo, iskaba ilow asaaska waxan suurta galka ihi uu cuskanayo eh"[1]

waynu ku dheeraan karnaa isku dayga aynu rabno inaynu ku qeexno awoodda, mase hubno in taasi wax tarayso.

**X/dhibaanka Degaanku markuu yahay Awood- adeegsade**

Waxa laga yaabaa in dadka qaar ay is waydiiyaan xikmadda ku jirta ka hadalka arinkan iyada oo lagu soo bandhigayo tiro ah qalab waxbarasho sida tan oo kale.
Ujeedada jirtaa waxa weeye in lagu qeexo awoodda weedhahan soo socda:

" Mawduucu aad ayuu ugu jiraa siyaasadda"

"Siyaasiyiinta deegaanku waxay haystaan imika awood ka badan tii ay xag masuuliyadeed isticmaali lahaayeen"

**Tababarka Hoggaanka la soo doorto**

"Awoodu waa shar, waa laga yaabaa in loo baahanyahay, hase yeeshee waa shar. Ilama aha in aynu ka hadalno."

"Waxa ugu dambeeya ee xubnaha golaha deegaanku u baahanayihiin waxa weeye awood dheeraad ah. Yaan la siin fikrado kale oo ay awood ku raadsadaan."

Waxa nasiib darro ah in weedhahaasi leeyihiin xadhig run ah oo isku xidhaya. Inagu ku talax tagi mayno raadinta tusaalayaal ku saabsan xad gudubka awoodda ee ay ku kacaan saraakiisha loo doortay deegaanku, ama si xun u isticmaalka suldadda uu xafiisku leeyahay. Waxana aynu nahay maskax gaab haddii aynu malaysano in aanu jirin qof doonaya xafiis bulsho oo is leh aad ka taajirtid ama aad soo hoysid guul siyaasadeed. Musuqmaasuqa awoodda deegaanku waxa weeye waliba xadgudubka ugu xun ee xagga suldada, maxaa yeelay wuxuu xadgudubku ku dhacayaa dadkii jaarkaaga ahaa "dadkaagii kula dhaqnaa". Kaasi waa deegaanka. Marka ay masuuliyaddu tahay mid qaran ayaaba laga yaabaa in dadkii jaarkaaga ahaa xidhiidhkiinu aanu badnayn oo muuqaalkoodu aad u koobanyahay, xadgudubka qof ahaantana inta ka soo gaadhaysaa ay yartahay.



Waxa aynu ognahay in ay suurto gal tahay in aad ku xadgudubto shaqadaada xubin gole

deegaanimo. Hase yeeshee gambada lacagtu waji kale ayay leedahay. Bal aynu wajigan kale eegno, awooddan aad heshay markii aad qabatay suldada xafiiskan laguu doortay sarkaal ahaan, waxa ku jira oo kale il awoodeed oo aad bulshadaada wax ugu qaban karto . waxaa laga yaabaa in aad dareentay in aanu isticmaalnay ereyga “Suldad” ama “masuuliyad” markii aanu isku dayaynay in aanu sharaxno asaaska awoodaada. Dadka qaar ayaa ku doodi kara in awoodda iyo masuuliyaddu isku mid yihiin, waxase aanu filaynaa in ay  kala duwanyihiin, bal inta ugu liidata waxa u dhexeeya faraq aynu waxoogaa kala soocidooda ku qaadano.

Mas’uuliyaddu waa haykalka sharci ee aad adiga iyo xubnaha golaha ee kale ku shaqaysaan si aad hawlaha u gudataan idinka oo bulshada matalaya. Masuuliyaddu waa nidaamka la isticmaalo si loo fuliyo qiyam la wadaago. Masuuliyaddu waa ogolaansho, adiga iyo golaha si sharci ah, laydiin siiyay in aad maaraysaan hawlaha qaar, isticmaashaana kayd la ogyahay si aad u gudataan ujeedooyin guud ama bulsho. Masuuliyadda xdubin golenimo waa isha sharci ama si rasmiga ah ee aad awooda ka qaadato, mase aha meesha kaliya ee aad awood ka qaadan karto si aad hawlahaaga u fuliso.

**X/dhibaanka Degaanku markuu yahay Awood- adeegsade**

Awoodu waxa weeye arin sixra oo soo jiita siyaasiyiinta iyo aqoonyahanadaba. Kol haddii labaduba ay karaan in ay arinkaa ka fikiraan. Aqoonyahanadu waxa ay isku dayeen in ay sharaxaan awoodu halka ay ka soo jeedo, halka siyaasiyiinta iyo qaar kalena ay arimahaa gacantaba ula tagaan. Labada qof ee kala ah French iyo Raven ayaa maareeyay sida ay u sharaxi lahaayeen ilaha awoodda, waana darajooyinkan:

1. Awooda abaalintu waxa ay ku dhisantahay anoo rumaysan in aad bixinayso abaalmarino- dalacaad, soo dhawayn, ictiraaf, suurta galin, helista qalab iyo kayd kale.
2. Awooda qasabka ahi waxa ay ka dhalanaysa aragtidayda ah in aad awood u leedahay ciqaab- inaad ixanuujiso, inaad digniin isiiso, inaad icasisho oo aad iga qaado dano aan haysto.
3. Awood sharci, waa mid shaqada rasmiga ah (kursiga) aad u hayso bulshada ku tiirsan. Tani waxa ay ku siinaynaysaa inaad awood aniga iyo qayrkayba nagu isticmaasho.
4. Awood la cuskado, waxa ay timaadaa marka aad qof u aragto inuu yahay mid leh raad ama calaamad dhalinaysa in la ixtiraamo, la yeelo, lagu xidhnaado ama loo hogaansamo.
5. Awooda khabiirka, waxa ay ku xidhantahay marka qof la rumaysanyahay inuu leeyahay cilmi gaar ah, ama xirfad ama khibrad.
6. Awood xogogaalnimo(war hayn), waxa ay timaadaa marka aad rumaysantahay in qof uu hayo war, ama heli karo war, aad u baahantahay[2] .

**Tababarka Hoggaanka la soo doorto**

> Lixdaa darajo ee awooda ah ee ay sharaxeen “ French iyo Raven” waxa aanu ku daraynaa laba dheeraad ah oo caadi u ah khibrada saraakiisha la soo doortay, waxana ay yihiin:

7. Awooda xidhiidhka, waxa ay ku xidhantahay adoo rumaysan in qof ah xubin gole uu

la leeyahay xidhiidh dad muhiim ah ama wax raadayn kara.

8. Awooda caawinta, waxa ay ka timaad kartida aad u leedahay in aad isu gayso awoodahaaga asaasiga ah laba ama in ka badan, kuwaas oo aan midna goonideeda natiijo u keenayan.

Bal aynu u eegno si xeel dheer meelaha xudunta u ah awooda. Saddexda hore (Abaalinta, qasabka, sharciga ) waxa ay ku xidhan yihiin xafiiskaaga. Kuwani waa awoodo la filayo oo si caadi ah kuugu imanaya marka laguu doorto xubin gole. Waxana ay ku siinayaan awood aad ku bedesho dhaqanka qof kale in kasta oo uu ka hor yimaado awoodaa aad ku bixinayso isbadalkiisa. Taas ayaa ah awooda dhabta ah.

Afarta ilood ee awoodda (xog, cukasho, khibrad, iyo xidhiidh) waxa la isticmaali karaa oo kaliya haddii dadka kale rumaystaan inaad leedahay ama haysato awooddaa. Si kale haddii loo dhigo, haddii aad rumaysantahay in aad khibrad u leedahay goob aad ku takhasustay, hase yeeshee aanay jirin cid kuu ogi, way adagtahay inaad awoodaa ka faa iidaysato. Arinkaa se wax ayaad ka badali kartaa. Waa haddii aad nagu qanciso inaaad tahay khabiir. Taasi ayaa ku dhaboobaysa awoodaha kalena. Tusaale ahaan waxaa laga yaabaa inaad dhab ahaantii xidhiidho leedahay, hase yeeshee taasi noqonmayso il awoodeed haddii dadkii aad la xidhiidhaysay aanay wanaag celin lahayn.

**X/dhibaanka Degaanku markuu yahay Awood- adeegsade**

Haddii si kale loo sheego, ilahaasi waxa ay u baahanyihiin xidhiidh in aad la samayso ciddaa kale si xidhiidhkaasi u noqdo xoojin aad u adeegsan karto wax qabadka.

Isha ugu dambaysaa waa awooda caawinta, waxana ay ku xidhantahay kartida aad wax ku dhalin karto una muujin karto in isku darka ilo awdoodeed oo badani ku siinayso kaydkii aad u baahnayd si waxa aad doonayso aad u qabato. Marka taa aad maskaxda ku sawirato, waxa dhab ah in aad u baahantahay kartidii aad si tayo leh isugu gayn lahayd.

**Tababarka Hoggaanka la soo doorto**

*Haddii miiqaqa xuubka caarada la isu geeyo*
*libaax way xidhi karaan*

Maahmaah "**Itoobiyan**" ah

## Ma qof mise wadar?

Dhinac kale oo arinka awooda laga eegayo waxa weeye in aad kali wax u qabanayso iyo in aad u baahantahay in cidi kula jirto.

Waxa aynu soo qaadnay wajiga ku saabsan wadar wax u qabashada, iyadoo la cuskanayo awoodahaagii sharci.

Inkasta oo awoodahaas xubnaha deegaanka qof qof loo siiyay way adagtahay in qof xubin gole deegaan ihi kale u isticmaalo. Maayarku se taa kalama sinna, waxa iyana aan la sinnayn xubnaha haya xafiis awood sharci leh. Laakiin bal aynu eegno ilaha awoodeed ee lagu siiyay addoo ah xubin goob wayn joogta ah. Si guud, kartidaada aad qof ama koox ku abaalin karto, ama aad ciqaabi karto qof ama koox (Awooddii qasabka), ama isticmaalayso

il awoodeed oo aad sharci u leedahay, sifo sharci ah, marka aad xubin gole ka tirsantahay way yartahay awoodaadii, ama maba jirto maxaa yeelay awooddii golahaa sharci ayaa kula wadaaga, adna xubin uun baad ka tahay. Markaa awoodaada dhabta ihi kuma jirto ilaha awoodeed ee asaagaa kula wadaago sida awooda abaalinta- qasabka- sharciga, ee dhab ahaantii waxa ay ku jirtaa isticmaalka awoodaha kale. Tusaale ahaan hadii aad leedahay sifo gaar ah oo soo jiidanaysa xubnaha deegaanka ee kale oo ay u janjeedhaan xubnuhu inay ogolaansho daayoo ku siiyaan codkooda iyaga oo eegaya sifooyinkaa aad leedahay tani waxa ay kordhinaysaa awooda aad qaybta u leedahay.

Taas oo kale ayaa ka suurtoobaysa awooda khibrada. Haddii asxaabtaadu ogtahay in aad taqaano inta ay yaqaanaan in ka badan oo ku saabsan mawduuc markaa la hayo, waxa laga yaabaa inay hoos yimaadaan aragtidaada marka go'aan wadareed la gaadhayo. Tani waxa ay kordhinaysaa awoodaada aad arimaha ku fuliso. Laakiin awooda la iska kaa siin maayo uun, ma la iska kaa siinayaa baad filaysaa? Waxa aynu dhamaan aragnay xaalada uu qof leeyahay khibrad badan hase yeeshee cidina ayna doonayn inay dhegaysato, maxaa yeelay waxa laga yaabaa in aanu soo jiidasho lahayn ama sumacadiisii khibradeed wax yeelay sababtu waxay doonto ha ahaatee.

**X/dhibaanka Degaanku markuu yahay Awood- adeegsade**

Awooda xog ogaalnimada iyo xidhiidhintu way adagtahay in la qiimeeyo marka ay dadku ka shaqaynayaan meel awooda ay wadari wadaagto. Haddii aad hayso xog aan dadka kale hayn oo aad si sharci ah u isticmaasho markii ay ku haboonayd waxa laga yaabaa in ay miisaankaaga kor u qaado xaga asaagaa, marka uu yimaad xiliga cod dhiibashadu. Mid ka mid ah qorayaagii buuga ayaa khibrad u lahaa maamulka magaalada taas oo halkan ka muuqanaysa. Golaha magaalada ayaa ku qal qaal jiray inuu u fidiyo heshiis biyo isticmaal ah oo faa iido badan leh goob macdanta lagu dhalaaliyo, heshiiskaa oo mad-madow lahaa waxa dhacay in agaasimihii magaaladu uu u sheegay golaha in qoladaa macdanta dhalaalisaa ay u isticmaalayeen qalab magaaladu leedahay sanado badan siyaalo aan sharci ahayn (Qalab lagu sheegay heshiiska cusub). Xogtaa la helay waxay si tayo leh u bedeshay golaha codayntiisii oo halkii ay uga codayn lahaayeen goobta macdanta ka shaqaysa, ka codeeyeen(diideen). (Waxa aynu ku dari karnaa in warkaa shaaca laga qaaday uu u dhawaaday inuu shaqada Agaasimihii magaalada ka eryo. Waxa la ogaaday in qofka leh goobtaa macdantu uu la leeyahay awood xidhiidh oo badan golaha, xidhiidhkaas oo ka badan ka Agaasimuhu golaha la leeyahay).

**Tababarka Hoggaanka la soo doorto**

Awooda caawintu waa mid leh guul iyo xoog ka badan inta dad badani rumaysanyihiin. Waxa jirta badiyaaba in masuuliyada sharci ee goluhu aanay ku filnayn, si loo fuliyo mashaariic murugsan, ama loo curiyo adeegyo muran badan oo adag. Hadaba xaaladahaa waxa macquul ah in si nidaam ah dib loogu eego meelaha awoodii taalo ee aynu sheegnay, si aynu u eegno inay jiraan fursado lagu isticmaali karo awoodo isku jira (wadaag ah) si ujeedadii loo fuliyo.



Awooda qofku waxa ay galaysaa meel la yaab leh oo maroorsan haddii goluhu laba kooxood u kala jabo oo qof ka mid ah xubnaha goluhu uu noqdo dhex, oo aanu dhinacna (labada is haya) ku biirin. Qofkaa "dhex-dhexaadka" ihi waxa laga yaabaa in aanu gaar ahaantii haddii sifaadkiisa la eego aanu awood badnayn, hadana qofka xaaladaa oo kale ku

Qormo

jiraa wuxuu karaa, sida in badan dhacda, inuu yeesho awood badan oo hadii sidaasi aanay jirin uuna yeesheen. Waxa aan jecelnahay mar kale in khibradayada aanu ku muujino arinkaa.

Qoraayasha (buuga) mid ka mid ah ayaa ku nool bulsho yar dhexdeed, halkaa oo muwaadiniintii qaar ay abaabuleen "Inqilaab" si ay u qabsadaan gudida bulshada ee tacliinta markii ay ascaartii kor u kacaday waxyalo kalena jireen. (Ogaan baa loo isticmaalay ereyga inqilaab si uu qofka u soo jiito). Dhab ahaantii muwaadiniintii waxay ku guulaysteen inay shan qof doorashadii ku soo saaraan, tan oo dhacday daqiiqadihii u danbeeyay, markii la qaaday doorasho dadka magacdooda la qorqorayay. Hadaba tirada golaha oo ah sagaal, waxa taa macneheedu yahay in guushii raacday markii ay aqlabiyadii noqdeen, yeesheena awood ay ku maamulaan cod bixinta iyo ajandahaba. Waa guul dhab ahaantii, hase yeeshee may waarin guushii. Waxa dhacday in mid ka mid ah qoladii cusbaa ee la soo doortay uu goostay inuu u janjeedhsado (lana shaqeeyo) xubnihii hore u sii joogay isaga oo khadkii u dhexeeyay labada kooxood ka gudbaya. Halkaa wuxuu khasaare ka dhigay dhammaan wixii guul xubnihiisii hore iyo taageerayaashoodii ay isu keeneen iyagoo doorasho kulul u soo galay si ay nidaamka iskuulka u qabsadaan. Haddaba awoodii xubinta dhex-dhexaadka ihi waa taa kolba cidda uu u codeeyaa ay guulaysanayso.

**X/dhibaanka Degaanku markuu yahay Awood- adeegsade**

Inta aynaan arinkan sii wadin waxa aanu ku siinaynaa fursad aad ku milicsato waxoogaa dadaalkaaga ku saabsan golaha deegaanka ama xaaladaha kale ee ku saabsan in aad awooda isticmaasho.

## Milicsi

**Tababarka Hoggaanka la soo doorto**

Xusuuso mar  ama laba jeer oo aad dareentay in aad "Awood wayntahay" adoo xubin deegaan ah. Maxay ahayd xaaladaasi?  Maxaad filaysaa inay ahayd awoodii aad isticmaalaysay?   Maxay ahayd natiijada ka dhalatay isticmaalka ishaa awoodeed?  Haddii xaaladdaasi dib kuu soo mari lahayd, arinka wax ma ka badli lahayd? Haddii aad badali lahayd , waa maxay waxaad badali lahayd , maxaanad u badali lahayd?

______________________________________________

______________________________________________

______________________________________________

______________________________________________

______________________________________________

______________________________________________



Imika ka fikir xaalad aad dareentay "Awood darro"  maxay ahayd xaaladdaasi? Maxaad sidaa u dareentay? Kumaa markaa awoodda lahaa? Maxaad filaysaa in uu ahaa nooca il

Qormo

X/dhibaanka Degaanku markuu yahay Awood- adeegsade

Tababarka Hoggaanka la soo doorto

awoodeed ee aad isticmaalaysay? Haddii aad fursad u heli lahayd soo noqoshada xaaladdii, maxaad si tii hore ka duwan u qaban lahayd si wax raadayntaadu u korodho?

______________________________

______________________________

______________________________

______________________________

______________________________

______________________________

______________________________

______________________________

______________________________

______________________________

______________________________

______________________________

## Fikrado kala duwan oo ku saabsan awoodda

1. Maxay hogaamiyayaasha la doortaa iyaga oo haysta awood badan oo rasmi ah hadana dhib badan ugala kulmaan wax qabashadii?

Waa arin laga xumaado miyaanay ahayn?

Waxa dhici kara in la rumaysan yahay ( ama ay tahay khuraafaad jira ) in awoodu la socoto xafiiska ama kursiga xubinta golaha “waxa uu leeyahay sharciga magaaladu waxaa waad qaban kartaa, waxaa kalena waad qaban kartaa, hase yeeshee markii wixiiba aad qabatay,wax wayni ma dhicin,” suurto gal matahay in dadka aan awooda gacanta ku haynin (dadka aan awooda lahaynin) in ay diidan yihiin in ay ogolaadaan sharaxa ka yimaada qof kuwii awooda oo si haysatay ay soo direen ?

Gabadha la yidhaahdo Elizabeth Janeway ayaa buugeedii ku dhaca lahaa ee ahaa “awooda dadka itaalka daran” ku tidhi “ awooda oo si habaysan loo isticmaalaa oo ladiido in wax la

Qormo

rumaystaa waa awooda u horeysa ee dadka jilicdasan “.
Awooda oo ay qabsadaana waxa ay ku bilaab maysaa marka ay iska diidaan sharaxa ay kuwa awooda haystaa isa siiyeen.

Qarniyo hore, (Greece) Giriigii hore ayaa ninka la yidhaahdo De mosthenes uu dadkiisa la taliyey isagoo yidhi: Qofka xikmada lihi wuxuu haystaa arin caadi ah oo uu aduunkan isku ilaaliyo, taasi oo nabad fiican u ah dadka dhamaantii. Maxaan ujeedaa? Waa in aanad cidna aaminin. I ga gunud taa, hayso taa,taas oo keliya illaasho,markaa weligaa dhaawacmi maysid.

Waxaa laga yaabaa inuu sheegista arinkaa ka yara bad badiyey, hase yeeshee waxa uu ku siinayaa fikrad la xidhiidha dhibta saraakiil badan oo bulshada u adeegaa ay la kulmayaan marka uu jawigu yahay shaki iyo aamin la’aan. Qofkii oo xag dhaqaale iyo xag bulshaba khasaare ku sugan,waxa kale oo aynu ku dari karnaa “oo waliba xuquuqdiisa siyaasadeed la duudsiyey; layaab ma laha in aanu rumaysan waxa ka soo baxa xafiisyada magaalada meelkasta oo caalamka ahba.gaar ahaan xaga siyaasada. Shakigaasi iyo aamin daraduba waxa weeyaan inta badan wax jira waana mid ka mid ah caqabadaha ugu waaweyn ee ay ku simbiririxanayso dawlada hoose ee tayada lihi.

**X/dhibaanka Degaanku markuu yahay Awood- adeegsade**

Awooda inta badan waxaa loo qaataa in ay tahay qorshe ka imanaya xaga madaxda oo hoos usoo daadagaya, halka dhab ahaantii labada dhinacba(madax iyo mijo) ay ka imanayso. Waxa laga yaabaa in ay taasi u noqoto daris jilcinaya dad badan oo u hanqal taagaya; “goobaha awooda” iyaga oo ay caddaanayso.

2. In awoodoodu ku xidhantahay in badan sida dadka kale iyaga u aaminaan. Markaa xubinta gole ee matalaysa bulshadu waxa ay ku kalsoonaan kartaa in awooda xoojinta bulshadu ay dhinac kasta jirto.

**Tababarka Hoggaanka la soo doorto**

3. xidhiidhada awoodu waa wax dhaqdhaqaaqaya oo aan taagnayn, lana kulmaya dib u tashi joogta ah.
Golaha deegaanku wuxuu u baahanyahay inuu xidhiidh la lahaado bulshada oo aanu ku ekaan doorashadii xafiiska bulshada loo doortay. Dhab ahaantii kor ayaa loo qaadi karaa mustawaha is dhexgalka iyo gorgortanka.
Haddaba marka aad xafiiska qabato ilaha awoodaadu kuma xidhna xafiiska aad hayso, ee waxa ay ku xidhanyihiiin kartidaada aad ku dhalin karto kalsooni iyo xidhiidhyo aad la yeelato kuwa kuu suurto galinaya in aad u isticmaasho awoodda xafiiskaaga si tayo leh.



4. Awood maqnaanta ayaa inta badan ku baahsan golaha la soo doortay oo ka badan awood isticmaalka. Mararka qaar, golayaasha la soo doortay wax dhacay ayuun bay talaabo ka qaadaan e iyagu wax ma keenaan, iyadoo intaa isbedelo dhakhsa ihi dhacayaan oo ay saadaalin karaan.

5. Awood maqnaanta wax ay qofka iyo bulshadaba ku keentaa nuglaasho xagga deegaanka ah. Marka uu qofkii aynu u dooranay in uu ina hogaamiyo uu isagu

Qormo

X/dhibaanka Degaanku markuu yahay Awood- adeegsade

Tababarka Hoggaanka la soo doorto

go'aansan waayo in uu ina hogaamiyo uu isagu go'aansan waayo in uu ina hogaamiyo, nuglaan ayaa ina haleelaysa iyo in layna dago. Awoodu waa arin feejigni u baahan. Haddii qofku uu awoodii isticmaali waayo, maqnaanta awoodda ayaa marar badan looga dareen badanyahay isticmaalkooda.

6. Sidaa darteed waxa waxtar badan in la buuxiyo meelaha awoodu ka maqantahay lana maareeyo, taas oo ka waxtar badan in la curiyo awoodo cusub. Waxa jira hab caan ah oo mushkiladaha lagu xalilo oo sheegaya in uu ka waxtar badanyahay adoo meesha ka qaada wixii dhibaatada xalinteeda hortaagnaa, halkii aad isku hawli lahayd xoojinta xoogaga wax xalinaya. Arinkan oo dhab ah marka aynu ka hadlayno isticmaalka awoodda.

7. Marka dareenkaas lagu siiyay, waxa aad ogaataa in isticmaalka awoodda ee hogaanka la soo doortay uu yahay geeddi-socod leh is dhex gal iyo is kaashi, iyo gor gortan joogta ah oo dhexyaal kuwa leh awood ayaa haysataan iyo kuwa leh awood ma haysataan.
Qayb ka mid ah Hab-raacaka gorgortankani waxa weeye in lagu qanciyo hogaanka la soo doortay in awood isticmaalkoodu uu ku ekaado xuduudii la ogolaa, arinkan oo hoos imanaysa xidhiidhkii kuu sugayay isticmaalkii awoodda, adkaynayana sharciyadii.

8. Awoodda oo la wadaagaa la mid ma aha iyada oo la bixiyo. Qaar baa rumaysan in awoodu tahay ciyaar isu gaynteedu eber tahay.
Haddii aan awooddii ku siiyo ama aad igaga lunsato gorgortan, awoodii markaa ma haysto. Dhinacaa marka laga eego waan khasaaray.
Hase yeeshee awoodu waa sida jacaylka.
Haddii aad cid la wadaagto, ma aad lumin awooddii. Dhab ahaantii haddii halkaad ka bilowday la eego korodhsiimo ayaad heshay.

## Adiga iyo shaqaalahaaga ku kaalinaya

Waxaynu aad uga hadalnay xidhiidhka dhexyaal adiga iyo bulshada ama ciddii ku soo dooratay. Haddaad tahay hogaan la soo doortay waa in arinkani noqdaa ka u horeeya ee aad diiradda saarto. Waxa se jira xidhiidh kale oo daran oo loo baahanyahay
inaad ka fikirto xubin gole ahaan, ereyada ah,awood iyo masuuliyad.Waxa aynu ka hadlaynaa xidhiidhka aad la leedahay saraakiisha iyo shaqaalaha dawlad hoose. Awoooda aad leedahay adoo ah sarkaal la soo doortay (awooda aad wax ku qabanayso) waxa ay ka timid dadka kugu soo doortay sanduuqa codaynta, hase yeeshee kartidaada aad kula imanayso sifooyinkii awoodu waxa ay inta badan ku jirtaa gacanta kuwa aad ka shaqaysiiso iyo kuwa qaybaha kale ee dawladu ka shaqysiiyaan kana gaysta adeeg iyo barnaamijyo goobta aad ka taliso. Arimahaa inta badan xidhiidhka jilicdasan ee ka dhexeeya siyaasada iyo gudbinta wixii ay go'amo lahayd, waxa ka turjumaya kartida aad u leedahay in aad arimahaa maarayso oo aad fuliso. Dawlada hoose oo badan ayaa awoodoodu liidataa.waxa inta badan ka dhiman maamulkii. Farsamadii iyo aqoontii xirfadeed e ay ku fulin lahaayeen

siyaasada iyo miisaaniyadaha la rabo. Inta badan ma laha awood iyo masuuliyad ay ku qabtaan shaqadii loo dhiibay. Waxa jira istraatijiyo badan oo aad isticmaali karto si aad u diyaariso habab fulineed oo tayo leh, waxa aanu rabnaa in aanu soo koobno doodayada ku saabsan qaybtan iyo kaalintaada awood wax ku qabasho.

In badan oo ah arimaha laga sheegay awoodu waxa ay si guud, iyo xag bulshaba, ku saabsan yihiin xidhiidhkaaga aad la leedahay saraakiisha iyo shaqaaalaha dawlada hoose. Waxa aad haysataa awoodo sharci, abaalin, caawin, waana in aanay awoodaasi si fudud kaaga fara bixin kuna lumin madaxa iyo minjaha dhexdooda. Dhinaca kalena shaqaalahaagu ma awood la'a. Bal aynu si kooban u eegno awoodahooda qaar ka mid ah.

1) Waxa ay shaqaaluhu inta badan leeyihiin xirfado iyo khibrado ay adagtahay in la bedelo.

2) Shaqaaluhu waxa ay leeyihiin dad aqoon gaar ah leh, xog gaar ahna ka haya ururku sida uu u shaqeeyo iyo bulshada. Taasi oo qiimo wayn u leh fulinta barnaamijyada iyo adeegyada socda.

**X/dhibaanka Degaanku markuu yahay Awood- adeegsade**

3) Shaqaalaha dawlada hoose waxa ay ku sugan yihiin goob aan meelina la mid ahayn waxana ay heli karaan shabakad asxaab ah iyo taageerayaal lagaga hor iman karo golaha, waa hadii shaqaaluhu malaystaan in aad cadaalad darro samaysay xaga awood isticmaalka.

4) Dadka ka shaqeeya dawlada hoose waxay haystaan jidad badan oo ay ku bedeli karaan ama ku kharibi karaan ujeedooyinkii wanaagsanaa ee barnaamijyada iyo adeegyada golaha dawlada hoose.

**Tababarka Hoggaanka la soo doorto**

> Hadaad tahay Cuddadda dusheeda wax lagu
> garaaco,sabir ayaa lagaaga baahan yahay,
> haddii aad dubbe tahayna wax garaacid .
>
> Maah-maah Carbeed

## Samaynta xidhiidh tayo leh

Xidhiidhka shoqo ee dhex yaala golaha iyo shaqaalaha waa in loo arkaa mid wadaag ah oo isku xidhan. Waa isu baahan tihiin.

Si aad u guulaysataan iyo si yoolkiinii in badan u wada socdo. Tan micneheedu ma aha in aan is af garansho waa dhacayn, hase yeeshee waxa weeye in lagu xaliyo si is faham iyo is aamin ah. Halkan waxaad ku arki sidii awood wadaagaa labada gacmood ee dawladda hoose loo ilaalin lahaa iyadoo saxarka laga ilaalinayo, loona shaqaynayo si tayo leh.

Qormo

1. Ta ugu horaysa ee muhiimka ihi waxa weeye iyada oo la xoojiyo saraakiisha iyo shaqaalaha si ay u qabtaan waxa aad ka rabto.
   inta badan hogaamada la soo doortaa way xakameeyaan shaqaalahooda. Waxa ay hogaamadaasi ku hoobtaan in ay siiyaan shaqaalahooda masuuliyaddii ay ku shaqayn lahaayeen iyo xoriyaddii ay u baahnaayeen iyo adeegsiyadii ay ku fulin lahaayeen go'aamada shaqo maalmeedka. Curintii iyo dadaalkii dawladda hoose ayaa ragaadi noqonaysa marka shaqaalihii la siin waayo masuuliyaddii ay u baahnaayeen iyo madax banaani ay shaqooyinkoodii iyo xilalkoodii loo igmaday ay ku gutaan.

2. Waa in aad albaabada xidhiidhka ee adiga iyo shaqaalaha idiin dhexeeya aad ka dhigtaa qaar furan. Waana in aad isku daydaa in laga ilaaliyo arimaha lama filaanka ah xidhiidhkiina, labada dhinacba (madax iyo mijo).

3. Waa in barnaamijyadaada iyo adeegyadaaduba u jeedaan xagga yoolka, shaqaalaha xidhiidhka aad la leedahayna waa in sidaasi ku war galisaa. Waa in shaqaaluhu ogyahay dhinaca aad ka imanayso iyo waxa aad doonayso in la qabto. Waxa ugu wayn ee wax yeela wax qabadka dawladda hoose waxa weeye iyada oo aanu jirin tilmaamo cad cad oo la raaco, iyo tilmaamaahaasi oo ah qaar xidhiidh leh oo dhan u wada jeeda.

**X/dhibaanka Degaanku markuu yahay Awood- adeegsade**

4. waa in aad ogaataa in talaabooyinka aad qaado ee aad dadka wax ku qasabtaa dhalin karaan is hortaag iyo aar gudasho. Waana isku dayo doona in ay dheeliyaan ama dib u dheeli tiraan xidhiidhka awoodda, inta badana uma hirgasho.

5. Mar kale, waxa muhiim ah in la sheego in awood wadaagu aanu la mid ahayn awooda oo aad bixiso. Golayaashu si guud waxa ay u egyihiin in ay neceb yihiin in ay cid la wadaagaan awooda iyo masuuliyadda ay bulshada u hayaan, waliba si gaar ah inay awoodaa shaqaalahoodu la wadaagaan ma jecla.

**Tababarka Hoggaanka la soo doorto**

Awooddu waa mawduuc murugsan. Mar kasta oo la soo qaado oo laga dhigo arin(eegid u baahan) horumarinta saraakiisha la soo doortay, doodaa waxa ceeryaamo ku qariya dareenka oo kaca iyo dadka oo shakiya. Hal ku dhegyada caanka ah ee awoodda ku saabsan waxa ka mid ah "Awoodu musuq ayay keentaa, awoodda buuxdaana musuq maasuq buuxa ayay keentaa" . waxa loo baahanyahay in aynu awoodda ka xusuusano waxa weeye faaladii **Disraeli** ee ahayd: " awood oo dhami waa xil, sida aynu u gudanana waa laynagala xisaabtamayaa, dhinaca dadkii ina keenay iyo kuwa aynu wax u qabanaynaba, arinkaasi waa mid jiraya".

Qormo

X/dhibaanka Degaanku markuu yahay Awood- adeegsade

**Tababarka Hoggaanka la soo doorto**



## Qodobbo muhiim ah

- Kaalinta awood wax ku qabashadu waa mid ka mid ah shaqooyinka xubinta golaha ee aadka uugu dhaw sixun u isticmaal.
- Awoodaasi dhinaca kale waa ta caawinaysa golaha si ay tayo xoogleh u yeeshaan si uu u yimaado is bedel bulsho.
- Waana ta ugu murugta badan xag maamul, qof ahaan iyo wadar ahaanba.
- Masuuliyadu waa haykalkii sharciga ahaa. Iyo aasaaskii awooda, iyada ayeyna xubnaha goluhu ku hawl galaan si ay isbedel u keenaan.iyagoo bulshada metelaaya.
- Waxay xubnaha goluhu haystaan ilo awoodeed oo badan oo ay isticmaali karaan si ay waxa u qabtaan .
- Qofka xubinta gole ahi waxa ugu wayn ee u xaga awooda ka gaysan karaa waxa weeye isaga oo faraha ka qaada in uu awooda u adeegsado dan gaar ahaaneed iyo in uu ujeediyo awoodii si goluhu awood badan u yeesho iyadoo bulshadii lagu xad gudbaayo.
- Awoodu ma aha uun qorshe xaga sare ka imanaaya oo hoos u soo daadagaaya. Awoodu dhinac kasta waa ay u socotaa.
- Awoodu waa mid dhaqdhaqaaq leh. Wada tashi joogta ahina dhexyaal ka isleh awood baad leedahay iyo kuwa isleh ma lihidin (awood).
- Waxa muhiim ah in meelaha awoda wax ka dhiman yihiin xaga bulshada la buuxiyo halkii laga hindisi lahaa booto iyo awood badsi.
- Maaraynta xidhiidhka awoodeed ee dawlada hoose shaqaalaheedu waa muhiim, sida ay muhiimka u tahay maaraynta xidhiidhka awoodeed ee bulshada gudaheedu, waxase laga yaabaa in labadaasi si isku mid ah kuu soo jiidan.
- Waxa ugu horeeya ee aad qabanaysaa xaga xidhiidhka awooda waa adoo arka awood siinta cidii kaa soo horjeeday.
- Awooda oo la wadaagaa la mid maaha awooda oo la sika dhiibo taasi waa qaacidada u horeysa ee awood wax ku qabashada.

Qormo

## Raad-raac


1. Weber, Max, Aragtida Ururka Bulsho ama dhaqaale , waxa tarjumay A.M Henderson iyo T. Parsons ( New York, Jaamacadda Oxford Madbacadda 1974) p.152
2. French, J.R.B, Jr., iyo Raven, B., “Tiirarka awoodda bulshada” , Dowrin Cartwright (ed.) Baadhitaano ku saabsan awooda bulshada (Ann Arbor, MI, Jaamacadda Michigan, 1959), pp.155-164.
3. Janeway, Elizabeth, Awoodaha dadka jilicda san (New York, Alfred A Knopt, 1960), pp.157-167.


**X/dhibaanka Degaanku markuu yahay Awood- adeegsade**

**Tababarka Hoggaanka la soo doorto**

# Qaybta 2aad

# Aqoon-is-weydaarsi

# Xildhibaanka Degaanku markuu yahay Awood-adeegsade

**X/dhibaanka Degaanku markuu yahay Awood- adeegsade**

**Tababarka Hoggaanka la soo doorto**

# Muuqaal guud

**Ujeeddo:**

Ereyga awooda waxa ku ladhan micne aan wanaagsanayn marka la eego afaf iyo dhaqano badan. Waxa laga yaabaa in sababtu tahay iyada oo aduunku u janjeedho in lagu xidhiidhiyo awooda ficil oo xun sida musuqmaasuqa. Awooda oo si xun loo adeegsado,qasab IWM.

Dhab ahaantii lama odhan karo awoodu way xun tahay ama way wanaagsan tahay hadii laga sooco dadka isticmaalaya ujeedooyinkooda iyo falalkooda. Waxa la hubaa in awood la'aan qofna aanu wax muhiim ah qaban Karin. Xubnaha golaha ee haysta asaas awoodeed oo haboon iyo xirfadii awooda si tayo leh looga faa'idaysan lahaa, aad ayey ugu guulaysanyaan fulinta baahiyihii gooobihii laga soo doortay.

Ujeeddada dood cilmiyeedkani waxa weeye in ka qaygalayaasha laga siiyo fikrad meesha ay ka imanayso awooda ay haystaan ee ay wax ku qabanayaan waxa ay ka qaybgalyaashu fahmi doonaan halka ay ka timaad awood had iyo jeer ay isticmaalaan iyo sida ay u dhalin karaan xidhiidh awoodeeed oo tayo leh oo ay la yeeshaan dadka ay ku tiirsan yihiin xaga wax qabashada .

**X/dhibaanka Degaanku markuu yahay Awood- adeegsade**

**Wuxuu ka kooban yahay:**

Waxa aad hoos ku arki sharax kooban oo hawlkasta oo wax barasho ku saabsan iyada oo la qiyaasay wakhtiga aad u baahan tahay. Hadiise aad jeclaato in aad tartiibta wax ka bedesho ama meesha wax ka saarto ama ku biiriso qalab waxbarsho oo xagaaga aad ka hindistay way kuu bannaantahay.

**10.1 Layli diyaargarow ah: gole magaalo oo awood badan leh.**

**Tababarka Hoggaanka la soo doorto**

Dood kooban oo lagu eegaayo erayga ( awood) iyada oo ay ka qaygalayaasha kala qaybqaadanayaan golaha magaalada ee " magaalada dooda lagu qabanaayo". Waxa aragtiyahaa wadaagaya xubnaha golaha ee magaalooyinka kale ka yimid iyo xubnaha golaha ee magaalada martida loo yahay (30 daqiiqo).

**10.2 Tusmaynta xidhidhiidhada awooddda**

Waxa ay ka qayb galyaashu xasuusanayaan xaalada adag oo soo martay intii ay xubnaha golaha ahaayeen. Iyaga oo taa cuskanaya ayay diyaarinayaan khariirdad cid kasta lagu xusayo oo tusaysa xidhiidhada lala leeyahay dadka kale ee bulshada. Waa dadkii uu goluhu u baahday in uu la xidhiidho si xaaladaa uu u maareeyo. Xidhiidhadaa waxa lagu qiimaynayaa,wanaagsan, xun, dhexdhexaad, koox koox yarna waa looga doodayaa
(60 – 75 daqiiqo).

**Aqoon isweydaarsi**

### 10.3 Bandhigigga Tababaraha

Si kooban u soo bandhig kaalinta awood wax ku qabashada ee xubnaha golaha. Isticmaal qalabka qoraalka hore ku jira si aad faraqa jira u sharaxdo.
Ee u dhexeeya suldada iyo awooda waxa aanad sharaxdaa sideed ila awoodood oo u suurto galinaysa xubnaha golaha deegaanka. Ka dood xidhiidhada awoodda ee hogaanka la soo doortay, gaar ahaan xidhiidhka ka dhexeeya xubnaha golaha iyo xidhiidhka bulshada. ( 30 Daqiiqo).

### 10.4 Qiimayn: Waydiimo naftaada aad ku xoojinayso.

Ka qaybgalayaashu waxa ay buux buuxinayaan waydiimo ku saabsan ilaha awoodda ee ay haystaan haday xubno gole yihiin, iyo awoodaha kuwaa ka mid ah ee qof kastaa doonayo in uu xoojiyo si goluhu tayo badan u yeesho. (60 Daqiiqo).

### 10.5 Layli: dhacdooyin daran oo ku saabsan isticmaalka awoodda.

Adoo isticmaalaya qoraal ka kooban sagaal dhacdo oo daran oo ku saabsan awood isticmaaalka, ka qayb galayaashu ha ka doodaan dhacda kasta hana sheegaan isha awoodeed ee la isticmaalay (45 Daqiiqo).

**X/dhibaanka Degaanku markuu yahay Awood- adeegsade**

### 10.6 Layli xirfad gudbin ah.:

Waxa aad waydiisaa xildhibaanada in ay si gaar ah u milicsadaan markaa la wadaagaan kuwa kale waxa ay damacsanyihiin aqoon is waydaarsiga ka dib in ay ka yeelaan wixii ay barteen ee ku saabsanaa sida tayada leh ee awoodda loo isticmaalayo. Ku dhiiri in ay nidar ku galaan in ay isbedel sameeyaan (30-45 Daqiiqo)

**Tababarka Hoggaanka la soo doorto**

Aqoon isweydaarsi

Qoraalka Tababarka

# 10.1: Layli: Is-diyaarin ah: GOLE MAGAALO OO AWOOD BADAN

## Waqtiga loo baahan yahay: 30 Daqiiqo

## Ujeeddo:

Waxa layligan looga jeedaa in la siiyo erayga (awood) dareen caadiya marka lagu isticmaalo golaha, magaalada iyo in la dhiiriyo sidii loo heli lahaa dood qiiima leh

## Hab-raaca

Ku bilow dood cilmiyeedka weedha ( khaanada hoos ku jirta ) waxaana aad raacisaa sadex su'aalood. Waxa aad waydiisaa ka qaybgalayaasha inay su'aal kasta ka jawaabaan.

**X/dhibaanka Degaanku markuu yahay Awood- adeegsade**

**Weedh**

Markii aan dood cilmiyeedkan saaka ku soo socday, waxa aan maqlay qof leh golaha magaalada ee halkani (magaaladani) aad ayuu u awood badan yahay.

## Su'aalo

**Tababarka Hoggaanka la soo doorto**

1. Marka aad maqasho erayga (awood) muxuu ku siiyaa dareen?
2. Qolooyinkiina ku jira golaha magaalooyinka kale, maxaad filaysaan in loola jeedo erayga ah ( awood badan).?
3. Qolooyinkiina ka shaqeeya magaaladan maxay idin la tahay in eraygaa looga jeedo?

## 10.2 Layli: TUSMAYNTA XIDHIIDHKA AWOODDA

## waqtiga loo baahan yahay: 60 daqiiqo

## Ujeeddo:

Layligan waxa la rabaa ina uu caawiyo ka qaybgalayaasha si ay si badan ugu baraarugsanaadaan ilaha awooda ee bulshada, taas oo ay waajib tahay in ay eegaan, marka ay fulinayaan ujeedooyinka golohooda. Ujeedo kale waxa weeye in la caawiyo ka qaybgalyaasha si ay u qiimeeyaan raadka il kasta oo laga fili karo awooda bulshada si ujeedadii u fusho, ishaasi ha ahaato mid wax hagaajinaysa ama ha ahaato mid wax xumaynaysa.

## Hab-raaca:

Waydii ka qaybgalyaasha inay xusuustaan xaalad dhawayd oo laga rabay golaha ina uu cadeeyo mawqifkiisa ama uu qaado talaabo adag oo laga yaabo in xag siyasadeed in la isku seegsan yahay, waa go'aan dano badani ku xidhnaayeen, khusaynayana kooxo badan oo bulshada ah, waxa aad waydiisaa in ay xaalada si gaar ah u tilmaamaan sheegaana cida ay khusayso.

Marka ay ka qayb galayaashu xasuustaan xaaladii waxa aad waydiisaa in ay buuxbuuxiyaan khariidadii xidhiidhada awooda ee ku xusan boga soo socda. Waxa aad ku tidhaa ku dhiga golaha wareega (Daairada) khariidada badhtankeeda ku yaal.
Waxana aad sawirada sida beedka oo kale ah ku qoraysaa magacda danaha bulshada iyo kooxaha uu goluhu baahiyahooda uu danaynayo ama in uu daneeyo ay tahay. Waxa aad soo jeedisaa in magacda ilaha awooda ee ugu mihiimsan lagu dhigo goobaha ugu xiga dhinaca golaha. Kuwa aan muhiimka ahayna ka fogee halka golaha aad ku sawirtay.

**X/dhibaanka Degaanku markuu yahay Awood- adeegsade**

Ugu dambayntiina waxa aad waydiisaa ka qaybgalyaasha in ay ku noqdaan khariidadoodii dhamaatay waxana aad u calaamadisaaa ilkasta oo ka mid ah ilaha awooda sida soo socata.

+ = Ilo awoodeed oo togan
- = Ilo awoodeed oo taban

**Tababarka Hoggaanka la soo doorto**

**Aqoon isweydaarsi**

**Qoraalka Tababarka**

## Tusaale:




Marka ay ka qayb galayaashu dhameeyaan khariidadahoodii gaarka ahaa, waxa aad u kala qaybisaa kooxo yar-yar oo saddex ilaa shan, mid kasta ka koobanyahay. Ku dhiiri inay xogta wadaagaan iyo dareen kala qaadashada. Xaalad kasta su'aalaha dooda ee muhiimka ah waxa ka mid noqon kara :

**X/dhibaanka Degaanku markuu yahay Awood- adeegsade**

1. Waa maxay taageerada ama kaalmada ay gaystaan kuwaa aad ku qortay liiska ilaha awooda ee wax tarka leh ? maxaad yeelaysaa si aad waliba taageero dheeraad ah uuga hesho iyaga mustaqbalka?

2. Maxay sameeyeen kuwa aad ku qortay liiska wax tar la'aantu si ay isu hortaagaan shaqada ama kaaga- hor-yimaadaan xaaladdaa laga hadlayo?. Maxaa la yeeli doonaa si loo tir-tiro mucaaridnmadooda ma loo badali karaa taageero?, sidee taasi u dhacaysaa?.

3. Maxaa la samaynayaa si loo xoojiyo dadka kale ee bulshada si ay adiga iyo golaha u taageeraan mustaqbalka?.

**Tababarka Hoggaanka la soo doorto**

**Aqoon isweydaarsi**

**Qoraalka Tababarka**

## 10.3 Bandhigga Tababaraha

### waqtiga loo baahan yahay: 30 daqiiqo

### Ujeeddo:

Waxa halkan lagu soo bandhigayo waxa looga jeedaa in ka qaybgalyaasha laga siiyo fikrad iyo sawir kaalinta (awood wax ku qabashada ) iyo in la siiyo fikrad asaasi ah oo ay ku isticmaali karaan layliga qofka ama kooxda loogu talo galay ee ku jira dood cilmiyeedkan.

### Hab-raaca

Diyaari waxa aad soo ban dhigayso adoo adeegsanaaya warka qoraalkii hore ku jira ee ku saabsanaa kaalinta qofka awoodiisa wax ku qabsanayo. Waxa aad ku soo dartaa faraqa u dhaxeeya masuuliyada iyo awooda,waxaanaad sharaxdaa sideed ilood oo ay xubnaha goluhu awood ku heli karaan, waxa aad gorfaysaa xidhiidhka awoodeed ee hogaanka la soo doortay, gaar ahaan xidhiidhka awoodeed ee xubnaha golaha iyo bulshada.

Wararkii aad ku qoratay kaadhadhkii aad wax ku soo qoratay ayaa ku caawin kara si aad wararkii si habaysan ugu koobto ulana socoto barnaamijka. Waydii su'aalo kolba mar inta bandhigani uu socdo si aad u baadho in ka qayb galuhu uu kula socdo oo uu fahmahmay, iyo si aad u soo jeediso. Waxa aad ku kabtaa bandhig waxyaalo la arko, sida waraaqo warside ah oo la soo daabacay iyo sawiro filomo ah oo la soo bandhigo si ay fahamka ugu taageeraan.

**X/dhibaanka Degaanku markuu yahay Awood- adeegsade**

**Tababarka Hoggaanka la soo doorto**

**Aqoon isweydaarsi**

**Layli**

# 10:4. Is-qiimayn: waydiimo qof ahaaneed oo xoojin ah

## Waqtiga loo baahan yahay: 60 daqiiqo.

## Ujeeddo:

Sida mid inaga mid ihi uu awoodda wax ugaga sheegay buug hore loo daabacay, awoodu waa sida dhar kala jaad jaad ah oo lagu tuulay miis qof wadhata ihi leeyahay. Waana ay adagtahay in aad harqadeeda garato ama in ay ku leegtahay ilaa aad taabato oo aad ka gashato. Nimanka la yidhaa French iyo Raven ayaa keenay darajooyin badan oo awooda ah, taas oo aanu anakuna mid ama laba xagayaga kaga darnay. Ilahaa awoodda saddex ka mid ihi ( Abaalinta, Qasabka, Iyo awooda sharci) waxay diirada saarayaan qofkii awooda hayay iyo kartida uu u leeyahay inuu bedelo dhaqanka dadka kale haba ka madax adaygaan isbedelkaa eh. Afarta awoodood ee kale (Khabiirka, xogta, Awoodda la cuskado, Iyo awoodda xidhiidhka) waxa guusha badhkeed awood haystaha siiya fikradda dadka kale ka qabaan.

Layligani waxa uu garansiinayaa ka qaybgalayaasha ilaha awoodda ee ay haystaan, iyo inta ay ka isticmalayaan il awoodeed kasta, iyo ilaha ay ku shaqaynayaan si ay u kordhiyaan is xoojintooda.

**X/dhibaanka Degaanku markuu yahay Awood- adeegsade**

## Hab-raaca:

Sii ka qaybgala kasta sawir ka mid ah waydiimaha is xoojinta. kor u akhri tilmaamaha ku xusan xagga sare ee waydiimaha, halka ay ka qaybgalayaashu iyaga oo kula socda ay hoos u akhriyayaan. Waxaad waydiisaa ka qaybgalayaasha in ay buux-buuxiyaan waydiimaha kaligood . wuxuu arinkani qaadanayaa 15 Daqiiqo.

**Tababarka Hoggaanka la soo doorto**

Marka ay ka qaybgalayaashu waydiimaha dhamaystiraan, u qaybi saddex kooxood, waxa aad u soo jeedisaa ka qaybgalayaasha in waxa ay qoreen ay kooxahooda, qoloba qolo kale la wadaagaan soona jeediyaan sida qof kasta oo ka qaybgalayaasha ihi uu si ka tayo badan (sidii hore) uu u isticmaali lahaa ilaha awooda ee la doortay.

Haddii waqatigu saamaxo, kulansii ka qaybgalayaasha kuna marti qaad ina ay wadaagaan wax qiimo leh oo ay ka heleen layliga .

X/dhibaanka Degaanku markuu yahay Awood- adeegsade

Tababarka Hoggaanka la soo doorto

## WEYDIIMO QOF AHAANEED OO XOOJIN AH

### Tilmaamo:

Qof kasta oo xubin gole ahi wuxuu leeyahay ilo awoodeed, inkasta oo ilahaasi darajooyinkoodu kala sareeyaan, si uu howshiisa si tayo leh ugu guto. Waxa su'aalahan loo qorsheeyey si ay kaaga caawiyaan sidii aad u qiimayn lahayd awoodaha kala duwan ee aad haysato iyo sidii kor loogu qaadi lahaa awoodaasi si aad u hagaajiso heerka tayadaada, marka aad buuxbuuxinayso waxa aad ku qortaa calaamad afargeesyada hadalada ku hor qoran ee ku saabsan todobada ilo awoodeed, adoo ka trjumaya sida aad damacsan tahay xubun gole ahaan in aad awooda u isticmaasho.

| | Maya ma dhacdo, | ilaa waxoogaa ayay jirtaa | in xad ah bay jirtaa |
|---|---|---|---|
| 1) AWOODDA CIQAABTA: Waxa ay dadka kale ay rumaysan yihiin in aan ku ciqaabi doono casilaad,eri dano uu waayo. | ☐ | ☐ | ☐ |
| 2) AWOODDA SHARCI Xilkayga ayaa i siiyey in aan awoodda iyo raadayn ula tago dadka kale. | ☐ | ☐ | ☐ |
| 3) AWOOD LA CUSKADO Waxa ay dadka kale ii arkaan qof leh raad dhaliya in aan muto ixtiraam,adeecid,iyo in daacad loo noqdo. | ☐ | ☐ | ☐ |
| 4) AWOODDA KHABIIRNIMADA Waxa ay dadka kale rumaysan yihiin In aan leeyahay cilmi gaar ah, xirfad ama Khibrad caawinaysa sidii ay si tayo leh Waxa ay rabaan ugu fulin lahaayeen. | ☐ | ☐ | ☐ |
| 5) AWOODDA XOGTA Waxa ay dadka kale rumaysanyihiin in Aan hayo xog ama heli karo xog iyaga Muhiim u ah. | ☐ | ☐ | ☐ |
| 6) AWOODDA XIDHIIDHKA Waxa ay dadka kale rumaysan yihiin Inaan xidhiidh la leeyahay dad muhiim ah ama wax raadayn kara taasi oo iyaga | ☐ | ☐ | ☐ |

**Aqoon isweydaarsi**

**Qoraalka Tababarka**

Ku noqo jawaabaha ku saabsan il awoodeed kasta.
Bal eeg inta aad jeceshahay in dadka kale malaystaan in aad ka haysato ila awoodeed badan, awood kasta oo awoodaha ka mid ahna ka haysato in badan. Hadii arinku sidaa yahay waa maxay talaabooyinka aad qaadaysaa si aad u kordhiso awoodaada iyo raadayntaada xildhibaan ahaaneed?

1. Ku sheeg hoos ilaha awooda e aad jeceshahay ina aad ku shaqayso si aad u kordhiso awoodaada qof ahaaneed ama raadayntaada xildhibaaneed?

______________________________________

______________________________________

______________________________________

______________________________________

______________________________________

______________________________________

**X/dhibaanka Degaanku markuu yahay Awood- adeegsade**

**Tababarka Hoggaanka la soo doorto**

2- Waxaad hoos ku qortaa xaalad ama laba xaaladood oo aad doonayso in aad kor ugu qaado is xoojintaada.

_______________________________________________

_______________________________________________

_______________________________________________

_______________________________________________

_______________________________________________

3- Awoodaada aad kordhisay iyo wax raadayntaadu ma waxay ugu horeyn u jeedaa xaga(calaamadii mid ama in ka badan )

Dhinaca xubnaha golaha e kale ____________ ☐

Shaqaalaha dawlada hoose ________________ ☐

Kooxaha bulshada________________________ ☐

cid kale__________________________________ ☐

4- Waa maxay talaabooyinka aad qaadaysaa si aad u kordhiso awoodaada gaarka ah si aad u fuliso waxyaalahan aad rajaynayso.

_______________________________________________

_______________________________________________

_______________________________________________

_______________________________________________

_______________________________________________

**X/dhibaanka Degaanku markuu yahay Awood- adeegsade**

**Tababarka Hoggaanka la soo doorto**

Aqoon isweydaarsi

Qoraalka Tababarka

# 10.5 layli: Dhacdooyin badan oo ku saabsan isticmaalka awoodda

## Waqtiga loo baahan yahay: 45 daqiiqadood.

## Ujeeddo:

Waxa layligan looga jeedaa in la siiyo ka qaybgalyaasha carbis ay ku gartaan ilaha awooda e la isticmaalay dhacdooyin dhawr ah oo marar badan ka dhaca bulshada.

## Hab-raaca

Waxaad siisaa ka qaybgala kasta sawirka qoraal (eeg bogaga soo socda) ay ku qoran yihiin dhacdooyinka daran e ku saabsan isticmaalka awooda.
Waydii ka qaybgalayaasha in ay akhriyaan dhacdooyinka.

Marka ay ka qaybgalayaashu akhriyaan dhacdooyinkan, u qaybi kooxo yar yar koox walba weydii inay ka doodaan dhacdo kasta, astee ilaha awooda ee dhacdo kasta lagu isticmaalay ka dibna xulashooyinkooda geli meelaha banana ee hoose.

Marka ay tagaan 20 daqiiqo, dib ula kulan ka qaybgalayaashii, waxaanad waydiisaa in ay ku siiyaan riboodhyo iyo in ay natiijooyinka isu eegaan.

**X/dhibaanka Degaanku markuu yahay Awood- adeegsade**

**Tababarka Hoggaanka la soo doorto**

**Aqoon isweydaarsi**

**Layli**

**X/dhibaanka Degaanku markuu yahay Awood- adeegsade**

**Tababarka Hoggaanka la soo doorto**

# Sagaal dhacdo oo daran

## Dhacdada 1aad:

Waxa loo baahday in lagu soo kordhiyo suuq magaalada Hargaysa si dakhliga gobolka kor loogu qaado. Gobalkuna ma haysto waxyaalihii u suurta galin lahaa dhiska suuqa inkasta oo shaqaalaha farsamadu soo jeediyeen in dhiska kolba qayb la dhiso iyada oo la isticmaalayo kharashka gobolka. Wuxuu golihii goostay inuu dhulkii bixiyo si ay ganacsatada uugu suurta gasho ina ay ku dhisan kharashkooda gaarka ah loona soo celiyo mudo(10) sanadood ah.

| **Noocyada awoodda** |
|---|

## Dhacdada 2aad:

Golaha ayaa qaatay amar ay ku xakamaynayaan saacadaha cunista qaadku ainay noqdaan 4:00-600 galabnimo.

| **Noocyada awoodda** |
|---|

## Dhacdada 3aad:

Haweenka ayaa ku qancay in (100) doolar qofkasta oo hawaynay ah oo qaangaadh ihi bixiso sanadkii si loo dhiso xarun ay dumarku xirfado ku bartaan

| **Noocyada awoodda** |
|---|

## Dhacdada 4aad:

Fikrad ayaa la keenay ah in la beero geedo si loo ilaaliyo deegaanka dugsi sare ayaa masuuliyadaa dhir beerista qaatay.

| **Noocyada awoodda** |
|---|

**Aqoon isweydaarsi**

**Layli**

**Dhacdada 5aad**

Golaha ayaa soo jeediyay lacag wareegto ah oo kor loogu qaadayo haweenka qof-qof si ay u noqdaan qaar kontraagyo qaata.

| **Noocyada awoodda** |
|---|
| |

**Dhacdada 6aad**

Sanadkii u danbeeyay markii la doortay ayay laba xildhibaan oo cusubi ogaadiin in lunsiga lacagta goluhu ay noqotay wax caadi ah oo ay ogolyihiin xubnihii hore e golaha sii joogay. Waxana ay ka codsadeen golaha inuu dooro koox hawleed baadha gobolka waraaqihiisa lacagta ku saabsan. Markii arinkii soo shaac baxay ayay golihii ku kaliftay inuu dooro koox hawleed lana sameeyo baadhitaankii.

**X/dhibaanka Degaanku markuu yahay Awood- adeegsade**

| **Noocyada awoodda** |
|---|
| |

**Dhacdada 7aad.**

Golaha ayaa si guul leh u xaliyay dhibaato ku saabsan xoolo badan oo daaqaya wadooyinka waaweyn agtooda, markii uu soo saaray ganaax ah (5000) oo doolar ama xadhig hal bil ah ciddii arinkaa jabisa. Tan oo hoos u dhigtay shilalkii ka dhacayay wadooyinka sedex daloolow laba dalool muda sanad gudihii ah.

**Tababarka Hoggaanka la soo doorto**

| **Noocyada awoodda** |
|---|
| |

**Aqoon isweydaarsi**

**Layli**

**Dhacdada 8aad**

Xildhibaan ayaa isa saaray talaabo ah inuu ku qanciyo dhamaan xildhibaanada gobolada yar- yar e dagmada ina ay siiyaan ama u iibiyaan dhul haweenka si looga dhigo xarumo xirfadaha loogu tababaro.

| Noocyada awoodda |
| --- |
| |

**Dhacdada 9aad:**

Xubin gole ayay u suurta gashay ina ay qof hogaan ah oo fulin ah ugu yeedho inuu booqashooyin ku tago xarun caafimaad oo asaasi ah taas oo faa iido badan yeelatay oo heshay taageeradiisa si miisaaniyad iyo kharash dheeraad ah goobtii loo helo.

| Noocyada awoodda |
| --- |
| |

**X/dhibaanka Degaanku markuu yahay Awood- adeegsade**

**Tababarka Hoggaanka la soo doorto**

# 10.6. Layliga Xirfad gudbinta

***Waqtiga loo bahan yahay:30-40 daqiiqo***

**Ujeeddo:**

Layligani wuxuu caawinayaa ka qaybgalayaashu sidii ay u gudbin lahaayeen khibradii ay ka korodhsadeen aqoon is waydaarsiga, e loogu isticmaali lahaa nolosha dhabta ah e ku saabsan hawlaha loo soo doortay saraakiil ahaan. Waxa layligani diirada saarayaa soo qaadista waxyaalaha la filan karo, iyo in la gudo galo qorshayaal waaqici ah (dhab ah) iyo in qofku nidar galo. Shaqada inta badan qofka ayaa qabanaya halka badh uu wadaag ka noqonayo.

**Faraq wayn ayaa u dhaxeeya waxa oo aad garato**
**Iyo**
**Wixii oo aad qabato**

**X/dhibaanka Degaanku markuu yahay Awood- adeegsade**

Waxa guud ahaan laysku raacsan yahay in yoolka tababarku yahay in la hore mariyo sida ay dadku wax u falaan iyada oo la tusayo siyaalo ka wanaagsan (sida imika ay falaan). Dhab ahaantii guusha khibrada tababarka waxa lagu qiyaasi karaa inta qofku koro e isbadalo tababarka dhexdiisa iyo tabarka ka dibba.

Tababarka way yartahay inta uu sida ay tababarayaashu rajaynayaan u raadeeyo ka qaybgalayaasha aqoon iswaydaarsiga, gaar ahaan marka ay saacado kooban tababarkaa qaataan. Faraxaa xiliga joogaa wuxuu dhakhso u qarsoomayaa marka qofkii la tababaray ay ka horyimaadaan caadooyinkii hore e shaqadu ee ay is hortaagaan kaaliyayaashiisii shaqadu, kuwaasi oo aan tababarkan la wadaagin.

**Tababarka Hoggaanka la soo doorto**

Dhinaca kale, nidarka uu u galay qofku tababrkii iyo inuu isbadal sameeyo markii la gabagabaynayay aqoon isweydaarsigu, waxa uu caawinayaa in ka qaybgalayaashii ka xoog bataan waxyaalaha ka hor yimaada waxbarashadoodii, e ama naftooda ka yimaad ama goobtii ay ka shaqaynayeen.

Tababaruhu wuu caawin karaa ardaydaa sidii ay si guul leh uuga gudbi lahaayeen aduunkii waxqabadka, hadii uu dhigo layliyo qorsheed kooban. Sidan uga fakir.

Waqtiga lagu qaato dhiirinta in la gudbiyo wixii la soo bartay waxa laga yaabaa inuu noqdo, ka kala soocaya xiliga si kooban loogu qaadanayo afkaaro qiimo leh iyo xiliga la guda galayo khibrad noloshii wax ka badalaysa.

**Aqoon isweydaarsi**

**Layli**

**Layli**

Waxa aad ku qaadataa ugu yaraan nusa-saace, marka ay dood cilmiyeedku dhammaato, inaad dareenka ka qaybgalyaasha u soo jeediso waxyaalihii muhiimka ahaa ee ay barteen. Kuna dhiiri in ay arimahan ku tijaabiyaan kana fuliyaan shaqoyinkooda golaha (marka ay laabtaan). Waxa aad ku bilowdaa ina aad ka qaybgalayaasha siiso(15)daqiiqo si ay si gaar ah uga shaqeeyaan waydiimo fudud oo ku saabsan gudbinta waxbarashada.

Marka ay ka qaybgalayaashu dhameeyaan waydiimaha, waxa aad waydiisaa ina ay si dhakhso ah ugala qayb qaataan kooxdan laba ama sedex arimood oo ay damacsanyihiin in ay u qabtaan si ka duwan sidii ay hore ugu qaban jireen (kaalintooda xubin golenimo), iyagoo awoodooda waxku qabanaya. Taa oo dood cilmiyeedka lagu gabagabaynayo.

**X/dhibaanka Degaanku markuu yahay Awood- adeegsade**

**Tababarka Hoggaanka la soo doorto**

## WAYDIIMO KU SAABSAN GUDBINTA WIXII LA SOO BARTAY

Ku qaado daqiiqado waxoogaa ah ina aad milicsato kaalinta awood wax ku qabashada, iyo fikradaha cusub e aad ka dareentay. Markaa halkan banaan e hoose ku qor weedh ama laba weedhood si aad u sharaxdo wax ku soo jiitay oo aad ka baratay naftaada intii aad aqoon iswaydaarsiga ku jirtay.

____________________________________________

____________________________________________

____________________________________________

Adoo eegaya wixii aad naftaada ka baratay iyo waxyaalaha badan e suurta galka ah e lagu soo bandhigay aqoon iswaydaarsigan, waa maxay labada ama sadexda arimood e aad doonayso ina aad si sidii hore ka duwan u qabato kaalintaadii xildhibaan awoodiisii wax ku qabanaya ahaa.?

1. ________________________________________
2. ________________________________________
3. ________________________________________

**X/dhibaanka Degaanku markuu yahay Awood- adeegsade**

ugu danbayn waa maxay carqaladaha naftaada xageeda ah ama goobta shaqada ah e aad filayso ina aad la kulanto inta aad isku dayayso fulinta isbadaladan?
Maxaad qaban doontaa si si aad u qaado ama u yarayso carqaladahan?

**Tababarka Hoggaanka la soo doorto**

| **Carqalad carqalada** | **falkii aad ku qaadaysay** |
| --- | --- |
| 1. ____________________ | 1. ____________________ |
| 2. ____________________ | 2. ____________________ |
| 3. ____________________ | 3. ____________________ |

**Hadaad baran karto**
**waad fari kartaa**

**Aqoon isweydaarsi**

**Layli**

**X/dhibaanka Degaanku markuu yahay Awood- adeegsade**

**Tababarka Hoggaanka la soo doorto**

## PRIORITY ONE WORDS

| ENGLISH | SOMALI |
|---|---|
| 1. Accountability | **-Xisaabtan** |
| | -Xilkaa Saaran yahay |
| 2. Action plan | **-Qorshe hawleed.** |
| | -Wax-qabad hawleed |
| 3.Active Listening | **-dhegaysi feejigan** |
| | -Dhegaysi Darban |
| | -Dhegaysi Mug leh. |
| 4.Alternative | **-Kala Doorasho** |
| | -Wax bedeli kara wax kale |
| 5.Application | **-Arji** |
| | Codsi |
| | Adeegsi |
| 6.Assessment | **-Qiyaasid** |
| | -Qiimayn |
| 7.Authority | **-Suldada** |
| | -Awood xukun |
| 8.Awareness | **- Wacyi-galin** |
| | -Ka war qab |
| 9.Basic Education | **-Wax-barasho Asaasi ah.** |
| 10.Benificiery | **-Dan ku Qabe** |
| | -Ka faa'iidayste |
| 11.Cabacity Building | **-Kobcin wax Qabad** |
| | -Awood dhisid. |
| 12.Case Study | **-Daraasad Xaaladeed** |
| 13.Chick list | **-Liis Hubineed** |
| 14.Civic | **-Madani** |
| | -La xiriira magaalo |
| | -muwaadin |
| 15.Collaboration. | **-Gacan siin** |
| | -Wada shaqayn |
| | -Is Caawimid |
| 16.Commitee | **-Guddi** |
| 17.Communicator | **-Gaarsiiye** |
| | -Isgaadhsiiye |
| 18.Community | **-Beel** |
| | -Jaaliyad |

**Aqoon isweydaarsi**

**Qoraalka Tababarka**

**X/dhibaanka Degaanku markuu yahay Awood- adeegsade**

**Tababarka Hoggaanka la soo doorto**

**38**

| | |
|---|---|
| 19.Community Development | **-Horumarin Beeleed** |
| | -Horumarin Jaaliyadeed |
| 20.Concepts | **-Figrado** |
| | -Aragtiyo |
| 21.Conceptual Hat Rack | **-Figrada Metalaada Xilaalka** |
| 22.Conflict | **-Is-qabad/**Khilaaf |
| | **-** Iska hor imaad |
| 23.Consensus | **-Rayi la isku raacay** |
| | Aqbalaad figrad guud |
| 24.Consequently | **-Natiijo** |
| | -Cawaaqib |
| 25.Constituency | **-Dagaan Doorasho** |
| 26.Co-operation | **-Iskaashi** |
| | Wada shaqayn |
| 27.Council | **Gole** |
| 28.Councilor | **Xil-dhibaan Degaan** |
| | Xubin ka tirsan Gudiga degaanka |
| 29.Counter productive | **-Maax Dumin** |
| | -Lid ku ah. |
| 30.Criteria | **-Cabirka wax lagu saleeyo** |
| | Qoddobbo wax lagu saleeyo. |
| 31.Criteque | **-Wax lagu Saleeyo** |
| 32.Decion Maker | **-Goa'aamiye** |
| 33.Definition | **-Qeexid.** |
| 34.Delegation/Delegate | **-Wefti** |
| | -Ergo |
| 35.Democracy | **-Demoqraadiyad** |
| 36.Description | **-Tilmaan** |
| | -Sifo |
| | -Sharax |
| 37.Dialogue | **-Wada Hadal** |
| 38. Effective | **-Wax ku ool** |
| | -Sidii la rabay wax u tarid. |
| 39.Effective leadership | **-Hogaaminta wax ku oolka ah.** |
| 40.Effeciency | **-Wax qabad fiican leh** |
| 41.Elected Leadership | **-Hogaaminta la doortay** |
| 42.Empower/Empowerment | **-Awood siin** |
| | -Awood u fasaxid |

**Aqoon isweydaarsi**

**Qoraalka Tababarka**

**X/dhibaanka Degaanku markuu yahay Awood- adeegsade**

**Tababarka Hoggaanka la soo doorto**

**39**

| | |
|---|---|
| 43.Enabler/Enable | **-Awood siin** |
| | -Karti siin |
| 44.Essay | **-Qormo** |
| | -Maqaal |
| 45.Ethical | **-Hab-dhaqan** |
| 46.Evaluation/Evaluate | **-Qiimayn** |
| 47. Evaluation Survey | **-Qiimayn Sahan** |
| | -Baaritaan qiimayneed |
| 48.Exercise | **-Layli** |
| 49Facilitator | **Fududeeye/**Sahle |
| 50.Feed back | **War Celin** |
| | Jawaab Celin |
| 51.Financier | **-Masuul Maaliyadeed.** |
| 52.Gender | **-Jandar** |
| 53.Goal | **-Hadaf** |
| | -Gool |
| 54.Good Governanace | **-Hab Xukun Wanaagsan** |
| | -Hab Maamul |
| 55.Government | **-Xukuumad** |
| 56.Group Discusion | **-Dood kooxeed** |
| 57.Guide | **-Tilmaamid** |
| | -Hage |
| 58.Hand Book | **-Tilmaan Bixiye** |
| | -Tilmaame Bare. |
| 59.Human Resources | **-Khayraadka Dadka** |
| 60.Human Settlement | **-Degsiimooyinka Aadanaha** |
| | Degaamayn |
| 61.Implementation | **-Hirgalin** |
| | -Fulin |
| 62.Information | **-Xog** |
| | -Wargelin |
| 63. Institution | **-Haya'ad** |
| 64. Institution Builder | **-Haya'ad Dhise** |
| 65.Institionalize | **-Haya'deeye** |
| 66.Instruction | **-Amar** |
| | -Wax barasho |
| | -Wax barid |
| 67.Key Point | **-Qoddobbo Muhiim ah.** |
| | Qoddobbo Ma Dhaafaan ah |

**Aqoon isweydaarsi**

**Layli**

**X/dhibaanka Degaanku markuu yahay Awood- adeegsade**

**Tababarka Hoggaanka la soo doorto**



| | |
|---|---|
| 68.Leadership Process | **-Geedi socod Hoggaamineed** |
| 69.Learning | **-Barasho** |
| | -Wax Barasho |
| | -Tacliin Barasho |
| 70.Learning Objective | **-Ujeeddooyinka Barashada** |
| | Yoolka Barashada |
| 71.Local Government/Authority | **-Dawladda Hoose** |
| 72.Majority | **-Aqlabiyad** |
| | -Inta Badan |
| 73.Management Process | **-Geedi Socodka Maaraynta** |
| 74.Meeting | **-Kulan** |
| | -Shir |
| 75.Minority | **-Inta Yar** |
| | -Laga tiro yar yahay |
| 76. Minutes | **-Hadal Qor** |
| | -Hadal qoraal |
| 77. Mission | **-Ergo** |
| | -Risaalo |
| 78. Monitoring | **-La socod** |
| | -La saan qaad |
| 79. Negotaition/Negotiator | **-Wada Xaajood siiye** |
| | -Wada Hadal siiye |
| | -Gorgoriye |
| 80. Networking | **-Shabakadeyn**/Nidaam hawleed oo wada shaqaynaya |
| 81.Organization | **-Urur** |
| 82. Over seer | **-Korjooge** |
| 83. Over view | **-Dulmar/**Guud Mar |
| 84. Participants | **-Ka-qayb-galayaasha/**Kaqayb-qaatayaasha |
| 85. Perception | **-Faham/**Dhugmo/Garasho. |
| 86. Performance | **-Waxqabad/**Fulin Hawleed. |
| 87. Perspective | **-Ka eegid wajio kala duwan.** |
| 88. Policy | **-Qorshe Hawleed/**Khidad/Siyaasad |
| 89.Policy Maker | **-Siyaasad Dejiye** |
| 90. Power Broker | **-Awood wax ku qabte/**Awood adeegsade |

| | |
|---|---|
| 91. presentation | -**Soo Bandhigid/**Qadimaad |
| 92. Proactive | -**Ka hor dhaaf/**Qorshe Curiye/Qorshe raac |
| 93.Process | -**Geedi socod/**Socodka |
| 94.Questionnairre | -**Weydiimo Qoran/**weydiimo taxane ah/weydiimo Sahan ah |
| 95.Quoum | -**Tirada ugu yar ee shirku ku ansixi karo** |
| 96.Rational | -**Maan-gal/**Macquul |
| 97.Reactive | -**Falcelin/**Qorshe laawe/Arrin ku baraarug |
| 98.Refrence | -**Tixraac/**Raad raac |
| 99.Reflection | -**ilays noqod/**Humaag noqod |
| 100.Resources | -**Khayraad.** |
| 101.Revenue | -**Dakhli** |
| 102.Role play | -**Door-jelid/**Door ciyaarid |
| 103.Session | -**Fadhi/**Kulan |
| 104.Shared Vision | -**Aragti wadaag** |
| 105.Simple Majority | -**Aqlabiyad hal dheeri ah.** |
| 106.Simulation | -**Iska yeelid/**U ekeysiin |
| 107.Slums | -**Buul caws/**Carshaan/Isku raran |
| 108.Solution | -**Furdaamin/**Xal |
| 109.Stakeholders | -**Daneeyayaal.** |
| 110.Strategic Plan | -**Qorshe istaratijiyadeed.** |
| 111.Strategy | -**Istaratijiyad/**Tab/xeelad |
| 112.Summary | -**Soo koobid/**Khulaaso |
| 113. Symptons | -**Astaamo/** Calaamado |
| 114. Systamatic | -**Habaysan/**Nidaamsan |
| 115.Technique | -**Farsamo**/Xeelad. |
| 116.Training Design. | **JaanjooyadaTababarka**/Naqshadeynta Tababarka |
| 117.Training Material. | -**Agabka Tababarka**/Qalabka Tababarka |
| 118.Traing Need assessment. | -**Qiyaasid baahida Tababarka/**Qiimeynta Baahida Tababarka |
| 119.Transparency. | -**Wax qaris laa'aan** |
| 120.Transparent | -**Qof aan waxba qarinaynin**. |
| 121.Unanimous | -**Loo dhan yahay**/Gedigood. |

**X/dhibaanka Degaanku markuu yahay Awood- adeegsade**

**Tababarka Hoggaanka la soo doorto**

| | |
|---|---|
| 122.Vision. | -**Aragti fog**/Aragti dheer |
| 123.Warm up exercise | -**Iskulalayn**/Qandhicin/Diiran |
| 124.Workshop. | -**Aqoon Isweydaarsi.** |

**Priority two words.**

| | |
|---|---|
| 125.Acknowledgment | -**Garwaaqsi**/Garawsi/Mahad-celin |
| 126.Administrative Fixes. | -**Adeegsi** |
| 127.Analysis | -**Gorfeyn**/Falanqeyn/Taxliil. |
| 128.Assignment. | -**Shaqo Mucayin ah** |
| 129.Assuption | -**Maleyn**/Si u qaadasho |
| 130.Benchmark | -**Bar qiyaaseed**/Bartilmameed |
| 131.Challenges | -**Caqabad**/Loolan/Hardan |
| 132.Collective | -**Kooxeed/**Urureed/Wadareed |
| 133.Conceptual frame work | -**Gadaan-fikradeed**/Aasaas fik |
| 134.Constructive | -**Wax dhisid**/Dhismo-gal |
| 135.Conventional Wisdom | -**Xikmad soo jireen ah.** |
| 136.Corruption | -**Musuq-maasuq**/Laaluush. |
| 137.Dilema | -**Laba daran mid dooro** |
| 138.Diversity | -**Kala duwanaan**/Kala gedisnaan |
| 139.Encouraging | -**Dhiiri-galin**/Geesinimo galin. |
| 140.Fundamental | -**Asal**/Aasaasi. |
| 141.Identification | -**Tilmaamid**/Baadi sooc/Aqoonsi. |
| 142.Indivitual Contribution. | -**Gacan ka geysi qofnimo**/In qof biiri |
| 143.Infrastructure | -**Dhismo-hooseed**. |
| 144.Input. | -**Wax galin** |
| 145.*nsight.* | -**Aragti Maskaxeed.** |
| 146.Inspiration. | -**Maan-godlin**/Ra’yi fiican helid. |
| 147.Interaction. | -**Isdhex-gal**/isla fal-gal/Isku dhafmid. |
| 148.Judgement | -**Xukun**/Go’aan |
| 149.Land Use Malaise. | -**Aafada dhul boobka**/Dhul ku habsa |
| 150.Multipurpose | -**Ujeeddo badan**/Ujeedooyin kala du |
| 151.Output. | -**Wax ka soo saarid.** |
| 152.Potential Candidate | -**Musharax dihin**/Musharax iman kara |
| 153.Pre-training. | -**Tababar horaad**/Tababar hortiis. |
| 154.Priority | -**Mudnaan**. |
| 155.Problem Solver | **Furdaamiye**/Xaliye dhib |

**X/dhibaanka Degaanku markuu yahay Awood- adeegsade**

**Tababarka Hoggaanka la soo doorto**

| | |
|---|---|
| 156.proficiency | -**Xirfad Hanasho**/Aqoon sare u leh. |
| 157.Public | -**Guud** |
| 158.Public Sector. | -**Qaybta Guud** |
| 159.Public Service | -**Adeeg guud.** |
| 160.Regulation | -**Xeer Hoosaad**. |
| 161.Self Governance. | -**Isxukumid.** |
| 162.Self Introduction. | -**Is-sheegid**/Is-tilmaamid. |
| 163.Self study. | -**Isbarid** |
| 164.Self Assesment | -**Isqiyaasid**/Isqiimeyn. |
| 165.Shirinking Resources. | -**Khayraadka sii yaranaya** |
| 166.Technical | -**Farsamo**/Farsamayn |
| 167Training needs. | -**Baahi tababar.** |
| **Priority three Words** | |
| 168.Absolute Poverty | -**Saboolnimo** |
| 169.Absolute | -**Gebi-ahaan**/Buuxda. |
| 170.ApplicationCommitments | -**Nidar-gal**/Daba-qaad ballan |
| 171.Bureaucracies | -**Biroqraadiyad**/Xafiisyad Dawladda oo shaqadoodu gaabis tahay |
| 172.Caution | -**Taxadar**/Digniin. |
| 173.Density | -**Cufnaan**/Jirmiga shega. |
| 174.Environmental Degradation | -**Hoos u dhac degaan**/Hoos u dhac xaaladda degaanka |
| 175.Equilibrium | -**Dheeli-tir**/Is-le'eg |
| 176.Hawker | -**Ha is wareerin**/Dadka badeecada naadiya |
| 177.Implication | -**Maldahnaan**/Hadal aan dhab loo muujin laakiin laga fahmi karo wajiga qofka. |
| 178.Jurisdiction. | -**Haya'addaha Garsoorka.** |
| 179.Legal Requirment. | -**Baahida Sharciyeed.** |
| 180.Legislation. | -**Xeer Degin.** |
| 181.Legitimate | -**Sharci ahaan**/Qaanuun ahaan |
| 182.Matchmaker | -**Isku aadiye wax isku habboon** |
| 183.Misinterpretation | -**Fasiraad xumo**/Fasiraad qaldan |
| 184.Off-spring | -**Farac.** |
| 185.Optimistic | -**Samo-filasho**/Samo arag/Dhanka Wanaagsan ka eeg |

**X/dhibaanka Degaanku markuu yahay Awood- adeegsade**

**Tababarka Hoggaanka la soo doorto**

| | |
|---|---|
| 186.Partnership | -**Wadaag**/Wada lahaansho. |
| 187.Pessimistic | -**Xumo arag**/Xuma filasho/Dhanka xun ka eeg |
| 188.Phenomina | -**Ifafaalayaal.** |
| 189.Professional | -**Xirfadle**/Xeel-dheeri |
| 190.Recycle | -**Sameyn celin**/Dib u nacfi galin |
| 191.Rules. | -**Qawaaniin**/Xeer |
| 192.Status Quo | -**Xaalad taagan** |
| 193.Stimulation. | -**Xiiso galin**/Fi-fircooni galin. |
| 194.To Wear different Hats. | -**Xilqaad badnaan**/Kaalimokala duwan qaa |
| 195.Waterpolution. | -**Dikhaw Biyood**/Wasakhaw Biyood/Dhiiq |
| 196.Facilitator | **-Fududeeye** |
| 197.Financier | **-Masuul Maaliyadeed** |
| 198.Gender | **-Jandar** |
| 199.Negotiator | **-Wada hadal siiye.** |
| 200.Overseer | **-Korjooge.** |
| 201.Policy Maker | **-Siyaasad dejiye** |
| 202.Power Broker | **-Awood wax ku Qabte.** |
| 203.Institution Builder | **-Haya'ad dhise** |
| 204.Leader | **-Hogaamiye** |
| 205.Leadership | **-Hogaamin** |

P.S.

In Each English word or term, the most common and acceptable Somali language definition is the first one, which is bolded.